

Gudniinka Fircooniga ah (FGM): Jirkaaga ADIGA ayaa iska leh.



SAFETY, TRUST AND RESPECT
DIOGELWCH, YMDDIRIED A PHARCH



Gudniinka Fircooniga waxaa loola jeedaa naafeynta xubinta taranka ee haweenka. Waa marka qof kale uu gooyo ama ka saaro qaar ama dhammaan xubnaha ku yaala xubinta taranka gabadhaha iyadoon jirin sabab caafimaad oo sidaan loo sameeyo. Waxaa sidoo kale loo yaqaanaa 'goyn' ama 'guditaanka dumarka'. Waxaa jira heerar kala duwan oo ah 'gudniinka' laakiin mid walbaa wuxuu leeyahay xanuun, murugo wuxuuna keeni karaa saameyn weyn, oo cimri dheer oo dhanka caafimaadka jirka iyo maskaxda ah.

Gabdhaha waxaa laga yaabaa in loo sheego in Gudniinka Fircooniga ah (FGM) uu 'ka difaaco' ceeb ama sharafdarro, iyo in gudniinka uu caawin doono inay ku noolaadaan nolol farxad leh. Wax kasta oo ay noqoto sababta, FGM (Gudniinka Fircooniga ah) waa xadgudub waana HAD IYO JEER wax khalad ah.

Xaqiiqdii jirkaaga wax ceebi ah ma lahan, sida uu yahay waa sida saxda ah. Waa sida lagu abuurey.

Sharaf dhac kuma jirto haddii aadan dooneynin inaad marto xanuun aan loo baahneyn.

Xadgudubka iyo rabshadaha waa inaan weligood la oggolaan mana keenaan wax farxad ah.

Dhammaan noocyada kala duwan ee gudniinka Fircooniga ahi (FGM) waa xad-gudub, waana sharci darro marka la joogo UK.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku noolaado badbaado iyo nabadgeliyo, xor ka ahaado cabsi iyo waxyeelo, gaar ahaan kuwa aan jecel nahay iyo kuwa yiraahda inay na jecel yihiin.

Haddii aad soo martay Gudniinka Fircooniga ah (FGM), ama aad ka walwalsan tahay inaad qatar ugu jirtid, **Marwalba caawimaad ayaa la heli karaa! Keligaa ma tihid.**

Ma lagugu soo sameeyey Gudniinka Fircooniga ah (FGM)? Caawinaad iyo taageero

Kala hadal la-taliye ka socda NSPCC adigoo:

Wacaya 0800 028 3550 (Khadadka caawinta FGM 24/7)

limayl u diraya fgmhelp@nspcc.org.uk

Ama booqo websaydkooda si aad u hesho wada sheekaysi 1-2-1 ah oo khadka tooska ah

Waxay kaala hadli karaan tallaabooyinka aad doonayso inaad qaaddo, oo ay kujirto halka laga helo caawimaad.

Haddii aad xannuunsan tahay ama aad dareemayso xanuun, runtii waa muhiim in aad hesho gargaar caafimaad:

Waad wici kartaa dhaqtarkaaga, ama haddii aadan hubin waxa la sameeyo, isku day inaad wacdo

Khadka caawinta ee NHS 111 Wales ee 24/7 ah adigoo garaacaya 111 ama 0845 46 47.

Haddii ay jirto xaalad degdeg ah, wac 999.

Ma ka welwelsan tahay Gudniinka Fircooniga ah (FGM) inuu kugu dhaco ama lagu sameeyo qof aad taqaanid?

Waxaa laga yaabaa inaad dareemayso cadaadis ah in lagugu sameeyo Gudniinka Fircooniga ah (FGM). Waxaa laga yaabaa inaad ka walwasho haddii aan lagu gudin, in qoyskaagu ay xanaaqi doonaan. Laga yaabee in lagu sheegay in sharafta qoyska ay ku xiran tahay gudniinka. Taasi OKEY ma'aha.

Gudniinka Fircooniga (FGM) weligiis OKEY ma ahan. Waa xadgudub. Waxaad xaq u leedahay inaad aaman ku noolaato oo aad caawimaad hesho.

Kor u hadlida iyo u sheegidda qof inaad walwalsan tahay waxay noqon kartaa mid laga cabsado. Waxaa laga yaabaa inaad ka walwalaysid inay waalidkaaga dhibaato ka soo gaarto, ama in qoyskaaga iyo bulshadaadu ay kaa soo horjeesanayaan. Waa caadi in aad sidaan oo kale dareento.

Halkaan hoose ka eeg sida loo helo talo-bixin iyo caawimaad.

Caawimaad

Talo bixin

Taageero

NSPCC - FGM Helpline - 0800 028 3550 - limayl fgmhelp@nspcc.org.uk – Wadasheekeysii 1-2-1 ah oo khadka tooska ah [halkan](#).
BAWSO - 0800 731 8147 - Macluumaad, Talo-bixin iyo Caawimaad loogu talagalay Dadka Madowga ah iyo Dadka laga tirada badan yahay ee Wales.

Daughters of Eve - text 07983 030 488 - waxay ka shaqeysaa sidii loo hormarin lahaa loona ilaalin lahaa xuquuqda jirka, maskaxda, galmada iyo xubinta taranka ee dhalinyarada da'yarta ah ee ku dhexnool bulshada ku dhaqanta gudniinka. Booqo [websaydkooda](#).

Petals - soo degso ablikeeshin loogu talagalay dhalinyarada app-kaas oo leh macluumaad ku saabsan gudniinka [halkan](#).

Everybody's Business – waa websaydh ku saabsan gudniinka fircooniga ah (FGM) oo ay maamulaan dad dhalinyaro ah. Booqo [halkan](#).



Live Fear Free Helpline
Llinell Gymorth
Byw Heb Ofn

0808 80 10 800



Cymorth i Ferched Cymru
Welsh Women's Aid

Guurka Qasabka ah



SAFETY, TRUST AND RESPECT
DIOGELWCH, YMDDIRIED A PHARCH



Markii laba qof ay is jecel yihih, waxay dooran karaan inay is guursadaan. Guur kasta, *labada* lammaane waa inay rabaan oo ay *isku raacaan* inay is guursadaan.

Qofna laguma qasbi karo inuu guursado qof uusan rabin. Waa khalad waana wax sharciga soo horjeeda.

Sababo badan ayaa jira oo keenta in qoysaska qaar ay carruurtooda ugu qasbaan inay guursadaan, oo ay ka mid yihiin: dhaqan diimeed ama dhaqan ahaan; ilaalinta sumcadda iyo sharafta qoyska; lacag; diiditaanka in ilmahoodu ay yihiin khaniisad, khaniis, ama laba-jinsiile; ma doonayaan in carruurtooda yeeshaan xiriir ama galmo; iyo cadaadis uga yimaada dhanka bulshada ama xubnaha kale ee qoyska. Waxaa laga yaabaa xitaa inay rumeystaan inay arrintaasi adiga kuu fiican tahay.

Ma jirto mid ka mid ah sababahaan oo fiican.

Guurka La Qabanqaabiyey

Mararka qaarkood, waalidiinta labada qoys ayaa u diyaarin kara carruurtooda inay isguursadaan markay weynaadaan. Tani waa hagaag haddiiba labada lammaane ay rabaan inay is guursadaan oo ay ku heshiiyeen guurka.

HAA, WAAN AWOODAA!
(waxaan rabaan inaan guursado)

Guurka Qasabka ah

Tani way ka duwan tahay. Waa marka mid ka mid ah ama labada lammaanaba lagu qasbo inay guursadaan iyagoon rabin. Guurka la qabanqaabiyey wuxuu isu bedeli karaa guur qasab ah haddii waalidiintaada aysan xtiraamin **xuquuqdaada ah inaad dhihi kartid 'maya'**. Guurka sidoo kale waa 'khasab' haddii mid ka mid ah lammaanaha uusan awood u lahayn inuu oggolaado. (tusaale ahaan ilmo ka yar 16 sano, ama qof weyn oo naafo ah)

MA LIHI XULASHO

Waad jeclaan kartaa waalidkaaga sidaas ay tahayna waxaad sidoo kale dareemi kartaa xanaaq, walwal, iyo murugo ku aadan guurka lagugu qasbayo. Waxaa laga yaabaa inay kuu sheegeen inaad ceeb ku soo jiideyso reerkaaga haddii aadan guursan. Waxaa laga yaabaa xitaa inay ku dhahaan inay ku diidi doonaan reer ahaan, ama kuugu hanjabaan inay ku rabshadeeyaan.

Tani waa xadgudub.

Ma ka walwalsan tahay in lagugu qasbi doono inaad guursato qof?

Ma dareemaysaa inaad ku xanniban tahay guur aadan dooran?

Waxaad heli kartaa caawimaad!

Caawimaad

Talo-bixin

Taageero

NSPCC Childline - 0800 11 11 – wada sheekeysii 1-2-1 ah oo Khadka tooska ah [halkan](#).

BAWSO - 0800 731 8147 - Macluumaad, Talobixin iyo Taageero loogu talagalay dadka BME ee Wales.

Live Fear Free - 0808 80 10 800 (taleefan) - 0786 00 77 333 (fariin) - [wadahadal toos ah](#)

Qeybta Guurka Qasabka ah (Forced Marriage Unit) - 020 7008 0151 - fmu@fco.gov.uk – lifaaqa websaydka ka hel [halkan](#).

Karma Nirvana - 0800 5999 247 - lifaaqa websaydka ka hel [halkan](#).

Haddii aad u maleynaysid in nololshaada ay halis ku jirto, wac 999. Haddii aad u maleynaysid in lagaa saari doono dalka si laguugu qasbo guur, la xiriir Qeybta Guurka Qasabka ah ama Childline.

Markaad joogto UK, haddii aad ka yar tahay 16 jir oo lagugu qasbayo inaad guursato, tani waxaa loo yaqaanaa guur carruureed waana sharci darro.



Live Fear Free Helpline
Llinell Gymorth Byw Heb Ofn
0808 80 10 800




Cymorth i Ferched Cymru
Welsh Women's Aid